



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/935/2022

TR. 13/09/2022

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALCOOB, CADEYN TARIKO, IYO WAKAALAD

Maanta oo ay taariikhdu tahay 13/09/2022, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-) **ABDINOR OMAR NUR(NINILE)**, Somali ah, Ku Dhashay Borame, Sanadkii 1966, Ina maryama guled Xuseen, sita Somali Passport Lr P00869234.

2-) **DAHIR ALI AHMED**, Somali ah, Ku Dhashay Lasqori, Sanadkii 1967, Ina Xaawo Maxamed Farax, sita Soomaali Passport Lr.P01020101..

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum **AXMED JAAMAC CALI QOORSHEEL**, kuna geeriyooday Abu Dhabi 2021, labadiisa waalidna ay ka geeri Horeeyeen, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya Xaas, 2 Wiil iyo Gabar, Waxayna kala yihiin sidan soo socota: -

DADKA: -

1-Fadumo	Hamud	Abdi	Degan	Abu Dhabi	Dhalatay 1950	(Xaaskii Marxuumka)
2-Ali	Ahmed	Jama	Degan	Abu Dhabi	Dhashay 1986	(Wiilkii Marxuumka)
3-Jama	Ahmed	Jama	Degan	Abu Dhabi	Dhashay 1987	(Wiilkii Marxuumka)
4-Zainab	Ahmed	Jama	Degan	Abu Dhabi	Dhalatay 1989	(Gabadhii Marxuumka)

Sidoo kale labada markhaati waxay maxkamadda horteeda ka caddeeyeen inaysan jirin cid kale oo dhaxlaysa Marxuumka oo nool ama dhintay ha ahaadaan asal ama farac.

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM AXMED JAAMAC CALI QOORSHEEL** uu ifka uga tagay Dhul Banaan oo ay ku wada qoran yihiin Marxuumka iyo **MAXAMUUD AXMED FAATAX** dhulkaas oo ku yaalla Degmada (**Afgoye 18 Palla**), lehna W.M.L. WHG/GGSH/H-04-86, Tr. 18/12/1986, cabirkiisuna yahay (**120-M-230-M-222-M-256-M**), lana mid ah (**40.000-MQ**) Soodimihiisuna Kala Yihiin Bari waxaa ka mara jid cadde, Koonfur waxaa ka xiga Wadada Tareenka, Galbeed Waxaa Ka xiga Goofka Xasan Hilowle, waqooyi waxaa ka xiga Beerta Abuukar Maxamed.

WAKAALAD.

- Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhamaan Dhaxaltooyada Sare ku Xusan ay Soo Wakiisheen **SACIID CALI QOORSHEEL**, Sida Ku Cad Warqad Wakaalad Tiro.SE/AD/9/224/2022,Tr: 30/08/2022, Kana Soo Baxday S.J.F.S Ee Abu Dhabi, kuna saxiixan tahay lataliyaha Safaaradda **Zahra Jama Hussein**, ayna soo wada xaqiijiyeen Wasaarada Arrrimaha dibada JFS iyo Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir, una soo wakiisheen dhammaantood in uu u maamuli Karo, dhaxalkoob u samayn Karo, xafidi Karo, gadi Karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, dhisi Karo, kireyn Karo, ka saari Karo, Saxiixi Karo kaalintooda, u doodi Karo una dacwoon Karo oo qareen u qaban Karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karo qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen Marxuum **AXMED JAAMAC CALI QOORSHEEL**.



SAWIRADA MARKHAATIYAASHA HANA DAMINUL MAALO

CABDINUUR CUMAR NUUR(NINILE)



DAAHIR CALI AXMED



DAMIINU MAAL

- **ABDINOR OMAR NUR(NINILE) & DAHIR ALI AHMED**, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaalada Sare Ku Xusan Soo diray.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- ABDINOR OMAR NUR (NINILE)

2- DAHIR ALI AHMED

=SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA=

SACIID CALI QOORSHEEL

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay Dukumintiga Guriga, ee uu marxuumka ku qoran yahay, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida **AXMED JAAMAC CALI QOORSHEEL**, oo ay dhaxalkooda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo maxkamadda Degmada Wadajir Sugeysaa in Dhamaan Dhaxaltooyada uu Wakiil u yahay **SACIID CALI QOORSHEEL**, Waana Sugitaan dhaxalkoob, Caddeyn Tariko iyo Wakaalad ansax ah, waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali



